student housing fact sheet

Waa maxay fursadaheyga gurigu?

Ardeydu badanaa waxay ka guuraan hal hoy oo nooc ah waxayna u guuraan mid kale isla marka baahidooda iyo xaalladooduba isbedesho. Tusaale, waxaa laga yaabaa inaad bilowdo waxbarashadaada adoo degan kambaska jaamacada ka hor intaadan u guurin guri aad cid kale la degto. Wax allaale wixii ay noqoto xaalladaadu, waa wax qiimo leh inaad baadho fursadaha kala duwan ka hor intaadan saxiixin heshiis ama aadan bixin wax lacag ah.

Waxaa jira lix furasadood oo guri oo ay nooc ahaan ardeydu wax ka doortaan:

> gurijoogid (boodhan)

> hoy ku yaal jaamacada

> hoyga ardeydu wada degto

> hoyga qol qolka loo degan yahay

> la degida guriga hoyga ah ee guryaha gaarka ah

> kalidaa kireysiga guryaha gaarka ah

➲ Labada fursadood ee ugu horeeya ee kore, homestay iyo hoyga kambaska jaamacada, ma daboolayaan *Residential Tenancies Act (RTA) 1997*, oo ah sharciga daboola xuquuqda iyo masuuliyaadka kireystaha iyo mulkiilaha fiktooriya.

Hoyga homestay

Homestay waa doorashada ugu caamsan ee ardayda u soo guurtay Fiktooriya wakhtigii ugu horeeyey amase aan hadda ka hor gurigooda bannaanka uga soo bixin, maadaama ay ku lug leedahay la degitaanka qofka guriga iska leh (iyo mar marka qaarkood qoyskooda) gurigooda.

Homestays badidooda waxaad helaysaa qol aad adigu iska leedahay oo sariir leh, miis iyo alaabta guriga ee aasaasiga ah, waana la wadaageysaa meelaha caamka ah sida fadhiga, jikada iyo qubeyska.

Guud ahaan waxaad bixineysaa 'boodhinka' si ay u daboosho kiradaada iyo kharashaadkaaga (sida korontada iyo gaaska), iyo sidoo kale ujrada wixii adeeg dheeraad ah. Qaar ka mid ah kuwa bixiya homestay, ama 'kuwa martida loo yahay' sida badanaa loogu yeero, waxay bixiyaan adeegyo dheeraad ah sida sameynta dhardhiqidaada iyo cunto siintaba, inkastoo sida wax yihiin ay ka duwanaan karto hal martigeliya marka loo eego mid kale.

Markaad degan tahay qof gurigiis, waxaa macquul ah inay jiri doonaan waxoogaa ah xeerarka guriga oo lagaa codsan doono inaad raacdo. Waxaa muhiim ah in adiga iyo martigeliyahaaguba aad isku raacdaan xeerarkan iyo kharashaadka adeegyada dheeraadka ah ka hor intaadan sameyn go'aanka ah inaad soo guurto.

Hoyga Homestay badanaa waxaa sameeya machadkaaga waxaana maamula adeega guriyeynta ardeyda ee machadka hay'ada homestay. Badanaa waxaa laguu geynayaa martigeliye aad isku xiiso tihiin oo laga yaabo inuu fuliyo baahi kasta oo khaas ah oo aad leedahay (sida cunta khudaarta qofka cunna).

Jeegaree adeega guriyeynta ardeyda ee ku saabsan nidaamkooda loogu soo jeedinayo iyo/ama iskiriingareynta kuwa bixiya homestay. Adeegaaga guriyeynta ardeyga wuxuu sidoo kale kaala tallin karaa in lagaa qaaday caddad kiro caddaalad ah iyo wixii adeegyo kale ah ee lacag laga bixiyey.

Faa'iidooyinka homestay

Homestay guud ahaan waa fursad ay awoodi karaan ardeydu waxayna ku siineysaa furfurnaan ah go'aansiga ilaa intaad joogeysid.

Ku noolaanshaha homestay waxay kaa qaadeysaa culeyska waajibaadka guriga sida maamulida biilasha, dukaan cunto ka soo gadashada iyo dhaqida dharkaaga – inkastoo weli lagaa rajeynayo inaad guriga ka caawiso waxyaalaha nadiifinta guud ku saaban.

Ardeyda meel gurigooda ka fog wax ka soo baraneysa fursadaani waxay siin kartaa fursad ay ku noolaadaan jewi qoys, si kastaba ha ahaatee waxaa laga yaabaa inaysan tani ku soo jiidan haddii aad jeclaan lahayd inaad u noolaato si aad u madax bannaan.

Hoyga kambaska jaamacadda

Hoyga kambaska (oo badanaa loogu yeero ama 'hoolasha degaanka') waa hoy ay jaamacadu leedahay oo ku yaal ama u dhow kambaska.

Jaamacadaha waa weyn badanaa waxay leeyihiin dhawr koleej, oo midwaliba ay dhigtaan boqolaal arday oo mid waliba leeyahay dabeecadiisa khaaska ah (tusaale, qaar waxay xiriir la leeyihiin kaniisada kiristaanka gaar ahaan ama waa koleejooyinka halka jinsi dhigto).

Sida hoyga homestay, hoyga kambaska wuxuu ku siinayaa qol aad iska leedahay oo si dhammeystiran u goglan oo leh tasiilaad guud oo la wadaago. Inta adeeg ee ay bixiso waxay ku xiran tahay koleejka – tusaale, qaar si buuxda waxay u bixiyaan cuntooyinka, kuwo kalena waxay bixiyaan hoyga kaliya.

➲ Hoyga aan wakhtiga go'an lahayn badanaa waa la helaa (oo la mid ah kuwa ay bixiyaan hoteelada iyo moteelada ganacsiga ah), inkastoo oo ay badanaa aad uga qaalisan yihiin hoyga wakhtiga dheer.

Hoyga kambaska wuxuu caam ku yahay ardeyda gurigooga ka soo tegay ee meel kale wax ka baranaya. Badanaa wuu ka qaalisan yahay homestay, inkastoo joogida ama u dhawaanshaha kambasku uu u egyahay inuu yareynayo kharashaadka gaadiidkaaga.

Eeg bogga kale...

TENANTS UNION of Victoria Ltd

Guryaha ardeyda

Guryaha ardeyda waxay la mid yihiin hoyga kambaska jaamacada, marka laga reebo in si gaar ah loo leeyahay iyo inaysan ku oolin kambaska (inkastoo ay badanaa ku yaalaan meel u dhow mid ama kuwo badan oo ka mid ah kambasyada magaalada).

Tirada guryaha ardeyda waxay u korortay si xooggan wakhtiyadan danbe si ay fuliyaan baahida ka imanaysa tuulooyinka Fiktooriya iyo dibeda ee doonaya hoy leh fursada ah inay dhammaan adeegooda loo qabto lagana shaqeeyo.

➲ Inkastoo bixiyayaasha guryaha ardeyda badidoodu ay kaa doonayaan inaad saxiixdo wakhti ijaar oo go'an (oo micnihiisu yahay inaad ogolaatay inaad joogto oo aad bixiso kirada ilaa wakhti sida 6, 9 ama 12 bilood), waxaa jira qaar bixiya wakhti gaaban ama hoy ku meel gaar ah.

Guryaha qol qolka loo kireeyo

Hoyga guryaha qolqolka waa meeshaad ka kireysato qol dhisme si gaar ah loo leeyahay- oo leh hal ama wax ka badan oo qolal kiro ah afar qof ama dad ka badan (oo aan ahayn ardey), oo aad wadaageysaan tasiilaadka guud.

Guryaha qolqolka ah waa inay ka diiwaan gashan yihiin golaha xaafada waana inay fuliyaan qaar ka mid ah heerarka ugu yar ee laga rabo. Si kasta ha ahaatee qaar ka mid ah guryaha qolqolka ah kuwa ka shaqeeyaa waxay ku guuldareystaan inay diiwaangeliyaan dabadeedna waxay bixiyaan hoy ka hooseeya heerkii loogu talagalay. Markaad ka fekereyso guryaha qolqolka loo kireeyo, waa inaad hubisaa inaad la macaamileyso mid sumcad leh oo aad ka jeegareysaa golaha xaafada inuu gurigan qolqolka loo kireynayaa uu ka diiwaangashan yahay. Haddii aadan hubin, la xiriir, Ururka Kireystayaasha (Tenants Union) wixii tallo ah ka hor intaadan bixin wax lacag ah ama aadan saxiixin heshiiska.

➲ Haddii aad kireysato qol la wadaago (meeshaas oo uu maareeyuhu ku soo dari karo qolka dad intaa ka sii badan) waa in lagaa qaadaa lacag ka yar intii aad ka bixin lahayd qol aad adigu leedahay.

Marmarka qaarkood hoteelada (ama kuwa khamriga), kuwo dalxiisayaasha iyo hoyga homestay waxaa loo tixgeliyaa inay yihiin guryaha qolqolka loo kireeyo marka loo eego *Residential Tenancies Act (RTA) 1997*. Hoyga nooca guriga ardeyda ah ee ay bixiyaan kambaska shirkado gaar ahi waxaa laga yaabaa in sidoo kale loo tixgeliyo sharci ahaan guryaha qolqolka ah oo kale.

Qolalka guryaha qol qolka ahi badanaa waa goglan yihiin, inkastoo ay tahay waxgarasho fiican inaad jeegareyso marka hore maadaama qolalka qaarkood aysan lahayn dhammaan alaabtaad u baahan tahay (tusaale, waxaa laga yaabaa inuusan lahayn kululeeye ama miis). Qofka iska leh guriga qolqolka ah ama waxaa laga yaabaa inuusan bixin adeeg dheeraad ah sida adeega dhar maydhida iyo cuntooyika.

Hoyga guriga la wadaago

Hoyga guriga la wadaago waa meesha aad si wada jir ah aadula kireysatay guri gaar ah oo kiro ah kuwo kale. Guriga la wadaago, waxaad leedahay qolkaaga, laakiinse waxaad la wadaageysaa tasiilaadka iyo alaabta kale.

Siduu u shaqeeyo guriga la wadaago wuxuu ka duwan yahay guriba guriga kale. Guryaha la wadaago qaarkood qof kastaa wuxuu bixiyaa waxoogaa lacag ah si loo bixiyo lacagta cuntada iyo tasiilaadka kale sida biilasha (oo marmarka qaarkood loogu yeero 'kitty'), meesha kuwo kale ay qaybsadaan biilasha oo qof walba laga rabo inuu soo sameysto cunto soo gadashadiisa iyo karinteedaba.

Maadaama kharashaadka la wadaago, tani waa ka kharash yar tahay kireysiga guri ama falaat adigu, laakiisne guriga la wadaago had iyo jeer ma aha jewiga ugu wanaagsan ee waxbarasho. Dadku si joogta ah ayey u guuraan una soo degaan tan oo noqon karta nooc waayo aragnimo nololeed ee guriga la wadaago laakiinse waxay u noqon kartaa nolol aan degitaan lahayn kuwo kale.

➲ Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan ku noolaanshaha guriga la wadaago eeg warqadeeda xaqiiqda ah ee ***Shared households*** iyo ***Keeping the 'mates' in housemates***.

Kalidaa kireysiga

Ka kireysiga guri, falaat ama unit mulkiile ama wakiilka guriga adiga kaligaa wuxuu noqon karaa mid qaali ah. Waxaad qaadi doontaa masuuliyada adiga kaligaa bixinta debaajiga iyo bixinta lacagta tasiilaadka kale (gaaska, biyaha, korontada iyo taleefanka). Faa'iidodarada waxaa ka mid ah suurtogalnimada dareemida ka go'naanta dadka kale iyo inaad adiga kaligaa masuul ka tahay wax soo gadashada, karinta iyo shaqada gurigaba.

Faa'iidooyinka inaad adigu kaligaa meel kireysato waxaa ka mid ah awoodida inaad yeelato jewi waxbarasho oo kugu haboon iyo u maamulida guriga sidii aad u aragto inay ku haboon tahay.

➲ Ka hor intaadan sameyn go'aankaaga ku saabsan fursadaha guriyeynta, arag warqadahayaga xaqiiqda ee guryaha ardeyda waa fursada guri ee iigu habooni waa tee? ***(Which housing option is right for me?)***

Wixii macluumaad dheeraad ah taleefan u dir Khadka Tallada Ururka Kireystayaasha (Tenants Union Advice Line) ☎ (03) 9416 2577.

Macluumaadkan waa tuse ahaan oo kaliya waana inaan loo isticmaalin wax kuu bedela tallada sharciga ee aqoonta leh.

Tenants Union of Victoria Ltd ACN 081 348 227 **May 2010** www.tuv.org.au

TENANTS UNION of Victoria Ltd

fact sheet student housing